# DUGSIYADA MAGAALADA COLUMBUS

## WAXBARASHADA CARUURNIMADA HORE

BUUGG-GACMEEDKA
QOYSKA

16-ka Ogoosto, 2021

**SHAXDA NUXURKA/TUSMOOYINKA**

**BOGGA**

HORDHAC/ GOGOL-DHIG … .......... 3

MANHAJKA .......... 4

BARNAAMIJKA WAX-QABAD-YADA … .......... 4

MAALMAHA HORUMARINTA XIRFADDA
GOOBAHA SAFARADA
BOOQASHOOYINKA GURIGA

SIYAASADDA IYO HAB-RAACYADA .......... 5-15

SAACADAHA SHAQADA
BIXIDDA HORE/BAAJINTA DUGSIGA
SOO-BOOQ-DAYAASHA
SIYAASADDA TABABARKA
MUSQUSHA
DIIWAAN-GELINTA/QORISTA
BEDELKA CINWAANKA
XEERKA LEBISKA
DHAR DHEERAAD AH
SIYAASADDA
NAFAQADA
XAFLADAHA FASALKA
QURAACDA
QIIMEYNTA CAAFIMAAD IYO ILKAHA
DAAWADA
XANUUNKA IYO CUDURKA LAKALA QAADO
SAWIRRADA
KA QAYB-GALKA IYO DAAHITAANKA
OGGOLAANSHAHA SOO QAADISTA ILMAHA
LAMBARADA DEG-DEGGA AH
BADBAADADA ILMAHA, IYO ILAALINTA SHARCIGA
EDABTA/ANSHAXA

ADEEGYADA WAXBARASHADA GAARKA AH ………. 16

QIIMEYNTA
BARNAAMIJKA WAXBARASHADA GAARKA/GOONI-GOONIDA AH (IEP-DA)
ADEEGYADA LA XIRIIRA
BAYAANKA DIB-U-QIIMEYNTA GAADIIDKA EE BARNAAMIJYADA DA'DA DUGSIGA
BARNAAMIJKA LATALINTA/HAGIDDA WAALIDKA

KA QAYB-QAADASHADA QOYSKA .......... 18

FOOMKA SAXIIXA HESHIISKA QOYSKA .......... 20

FOOMKA SAXIIXA SIYAASADDA KA QAYB-GALKA .......... 21

# HORDHAC/ GOGOL-DHIG

Barnaamijka Waxbarashada Carruurnimada Hore ee Dugsiyada Magaalada Columbus (ECE) waa barnaamij korriin ku habboon oo bixiya adeegyo dhammaystiran ee carruurta da'da dugsiga ka hor (preschool) iyo qoysaskooda ee aagagga waxbarashada, adeegyada caafimaadka, adeegyada bulshada, iyo bah-wadaagta/iskaashiga qoyska iyo bulshada. Ilmo kasta oo aanu u adeegno waxa uu noqon doonaa mid guulaysta oo u diyaarsan inuu galo dugsiga barbaarinta (kindergarten-ka) oo diyaar u ah inuu sii wato natiijada waxbarashada ee ka mid noqoshada barnaamijkaas:

- Wuxuu rumaysan yahay in ilmo kastaa wax baran karo oo uu wax baran doono
- Wuxuu u arkaa ballan-qaad ilma kasta, rajo iyo karti
- Wuxuu shaqaaleeyaa xubno shaqaale ah oo tayo sare leh oo heegan ah
- Wuxuu kormeeraa barnaamijyadeeda si uu u xaqiijiyo horumar joogto ah
- Wuxuu bixiyaa horumarinta xirfadeed ee ku socota shaqaalaheeda
- Wuxuu ku lug yeeshaa oo uu qiimeeyaa waalidiinta sidii bah-wadaag ahaan dhanka waxbarashada ilmahooda
- Wuxuu waafajiyaa manhaj waxbarasho ku habboon iyo qiimeynta heer gobol iyo heer qaran

Hadafka/ujeedada barnaamijka ECE ee Dugsiyada Magaalada Columbus waa in la siiyo aasaas adagg dhammaan carruurta - aasaas-kaas oo u diyaariya arday kasta heerka xiga ee waxbarashada iyo wixii ka dambeeya. Hadafkani/ujeedadani waxay ku salaysan tahay himilada iyo arag-tida guud ee Dugsiyada Magaalada Columbus: Arday kasta waa mid aad wax u bartay, una diyaarsan hoggaaminta iyo adeegga, iyo awoodsiinta guusha muwaadin ahaan ee bulshada caalamka iyo arag-tida guud 100% ee guusha ardayga.

Buug-gacmeedkan qoyska waa hage tixraaceed dhammaystiran oo ku saabsan siyaasadaha iyo nidaamyada carruurta taga/ ka qayb-gala barnaamijyada ay bixiso Dugsiyada Magaalada Columbus ee Qaybta Waxbarashada Carruurnimada Hore. Siyaasadaha iyo hab-raacyada waa la bedeli karaa markii loo baahdo.

## MANHAJKA

Barnaamijka Waxbarashada Caruurnimada Hore ee Dugsiyada Magaalada Columbus (ECE) waxay fulisaa manhaj qoran, cilmi-baaris ku salaysan kaas oo dhammaystiran oo waafaqsan Heerarka Mawduuca Waxbarashada Hore ee Ohio. Heerarkan waxaa soo dejisa Waaxda Waxbarashada Ohio, waxayna xoogga saaraan dhammaan dhinacyada korriinka - garashada, bulshada, dareenka/shucuurta iyo jirka/jidhka. Manhajka korriinka ku habboon waxa uu wax ka qabtaa baahiyaha waxbarasho ee carruurta gaarka ah, iyo sidoo kale baahiyaha kooxda ee dhammaan carruurta, oo ku hagaya dhammaantood guusha.

Xafiiska Waxbarashada Hore iyo U-diyaargarowga Dugsiga ayaa bixiyay tilmaanta baarista iyo qiimaynta carruurta da'da dugsiga ka hor (preschool). Natiijo ahaan, Barnaamijka Waxbarashada Caruurnimada Hore ee Dugsiyada Magaalada Columbus wuxuu aaminsan yahay in qiimayntu ay tahay hawl socota oo ay tahay in loo adeegsado/isticmaalo “sawir-qaadis” ah meesha uu ilmahaagu ku sugan yahay aagg kasta oo caruurnimada ka mid ah. Qiimaynta horumarka carruurtu waxay dhacdaa sanad-dugsiyeedka oo dhan.

Qalabka qiimaynta korriinka waxaa ka mid noqon/ku jiri kara:

- Qiimaynta Waxbarashada Hore ee Ohio (ELA)
- Qalabka Baarista lagu ogaado heerka baarista (Brigance)
- Qiimaynta Macallinka ee aan Rasmiga ahayn: ie (tusaale ahaan) indho-indheyn, diiwaanada sheeko-xariirada aan dhabta ahayn, liiska hubinta
- Qiimaynta manhajka

## BARNAAMIJKA WAX-QABAD-YADA

### MAALMAHA HORUMARINTA XIRFADDA

Lahaanshaha shaqaale tayo sare leh ayaa lagama maarmaan u ah tayada barnaamijka. Natiijo ahaan, dhowrka maalmood inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka ayaa loo qoondeeyay shaqaalaha si ay uga qayb- galaan fadhiyada horumarinta shaqaalaha. Taariikhahaas waxaa la aasaasay oo la siiyaa dhammaan qoysaska bilowga sanad-dugsiyeedka. **Maalmaha horumarinta xirfadeed ee ECE, ma jiro dugsi ay leeyihiin/dhigtaan carruurta ECE.**

### GOOBTA SAFARADA

Goobta safarada dibadda ee barnaamijka ECE waxaa loo tixgaliyaa qayb ka mid ah manhajka waxaana loo qorsheeyay mowduucyo, maalmo/dhacdooyin gaar ah iyo yoolalka/hadafyada barnaamijka. Dhammaan qoysaska waxaa laga codsanayaa inay buuxiyaan foomka bilawga sannad-dugsiyeedka, iyaga oo siinaya ilmahooda ogolaansho/fasax uu kaga qayb-qaadan karo dhammaan aagagga safarrada dibadda ee dugsiga. Ilmo kasta oo aan haysan foomka ogolaanshaha oo saxiixan waa inuu ku sugnaadaa guriga maalinta goobta ee safarka bannaanka. Kaliya Carruurta la siiyay fasaxa ayaa loo ogolaan doonaa inay aadaan safarada. Qaybta Carruurnimada Hore waxay soo dhawaynaysaa ka qayb-galka waalidka iyo qoyska waxayna ku dhiirigelisaa qoysaska inay la xiriiraan macallinka ilmahooda si ay macluumaad dheeraad ah uga helaan fursadaha wehelinta/raacidda.

## BOOQASHOOYINKA GURIGA

Iyada oo la raacayo dhammaan hab-raacyada/borotokoolka caafimaadka iyo bad-qabka gobolka, federaalka iyo degmada, shaqaalaha ECE (macallinka iyo kaaliyeyaasha waxbaridda) waxay mararka qaarkood sameeyaan booqashooyin guri oo ay kula wadaagaan qoysaska ka qayb-galaya. Waqtigan xaadirka ah waa waqtigii shaqaalaha wax-barashadu ay ku arki lahaayeen guriga ilmaha iyo qoysaskoodaba oo ay si fiican u bartaan. Waa fursad ay waalidku ku waydiiyaan su'aalo oo ay ku ogaadaan waxa ka dhacaya dugsiga ilmahooda. Waa kulan aan rasmi ahayn, qoysaskana lagama rabo/filayo inay maaweeliyaan ama siiyaan raashin fudud shaqaalaha. Booqashooyinka badankood waxay socdaan 20 ilaa 30 daqiiqo. Booqashada guriga waxaa la sii qorsheeyaa waqti ka hor, shaqaaluhuna waxay booqan doonaan oo keliya guryihii hore loogu qorsheeyay/diyaariyey.

Booqashooyinka guriga Virtual-ka ah (Online-ka ah) ayaa laga yaabaa in lagu daro sida loo arko inay u-habboon tahay iyo inkale.

# SIYAASADAHA & HAB-RAACYADA

## SIYAASAD DAAH-FURAN

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay leeyihiin siyaasad daah-furan. Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay soo booqdaan dugsiga, kormeeraan/indo-indheeyaan fasallada, iskaa wax u qabso kaga qayb-qaataan hawlaha dugsiga mar kasta oo ay suurtagal tahay. Shaqaalaha xafiisku waxay ogeysiin doonaan shaqaalaha ECE haddii waalidku uu yimaado qolkooda waa inay ula dhaqmaan si xushmad leh shaqaalaha.

Baahiyaha gooni-goonida ah/shirarka, waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay diyaariyaan wakhti gooni ah oo ay kula kulmaan shaqaalaha marka ardaydu aanay joogin.

Sida uu qabo sharciga shati bixinta dugsiga barbaarinta ka hor (Preschool) ee ODE 3301-37-07-(E): "Waalid kasta oo caruur leh oo ka diiwaan-gashan barnaamijka waa in loo oggolaadaa gelitaanka aan xadidnayn ee dugsiga inta lagu jiro saacadaha shaqada si uu ula xiriiro ilmahiisa, qiimeeyana daryeelka uu bixiso barnaamijka, dhismayaasha, ama ujeedooyin kale oo uu ansixiyay agaasimuhu. Marka ay soo galaan dhismaha, waalidku waa inuu war galiyaa/maraa xafiiska dugsiga."

## SAACADAHA SHAQADA

Fasalada ECE iyo inta badan fasalada ECE ee loo wada dhan yahay (fasalada leh ardayda qaba baahiyaha gaarka ah iyo facooda/asaagooda ee ECE) waxay raacaan jadwalka maalinta oo dhan, guud ahaan laga bilaabo 9:00 a.m., subaxnimo ilaa 3:30 p.m., ee galabnimo.

Si kastaba ha ahaatee, ardayda ECE waxa laga yaabaa inay ka qayb-qaataan barnaamijka quraacda ee dugsigooda kaas oo caadi ahaan bilaabma 8:30 a.m., subaxnimo.

Intaa waxaa dheer, waxaa jira fasallo ECE maalin barkeed/badhkeed ah oo loogu talagalay carruurta 3, 4, iyo 5 jirka ah ee loo aqoonsaday inay qabaan baahiyo gaar ah. Casharka subaxda ee fasalladan guud ahaan waa 9:00 a.m., subaxnimo ilaa 11:30 a.m., subaxnimo. Si kastaba ha ahaatee, ardaydani waxaa laga yaabaa inay ka qayb-qaataan barnaamijka quraacda ee dugsigooda oo caadi ahaan bilaabma 8:30 a.m., subaxnimo. Casharka galabnimo ee fasalladani waxay bilabmaan laga 1:00 p.m., duhurnimo ilaa 3:30 p.m., ee galabnimo.

## BIXIDDA HORE/BAAJINTA DUGSIGA

Waxaa jiri kara waqtiyo dugsigu xiran yahay oo aan ahayn kuwa loo aqoonsaday jadwalka dugsiga. Xaaladaha cimilada ee barafka sim-bi-ri-rixada leh, daadadka, iyo barafkuba waxay sababeen xiritaanka/xidhitaanka dugsiyada wakhti hore. Haddii dugsiyada loo xiro xaaladaha cimilada awgeed, macluumaadka waxaa lagu soo gudbin/dhejin doonaa mareegaha/websaydyada degmada waxaana looga dhawaaqi doonaa idaacadaha iyo telefishinada maxalliga ah.

## XEERAR HAGAYAASHA TABABARKA MUSQUSHA

Ilmaha waa in lagu tababaraa musqusha ka hor inta uusan tagin barnaamijka ECE ee degmada. Carruurta ECE ee u tababaran musqusha: mar dambe ma xiran/xidhan doonaan xafaayadaha (diapers) ama kastuumada/nigisyada la tuuri karo ee (pull ups-ka), dadka waa-weyn waxay u sheegi karaan ilmaha marka ay u baahan yihiin inay aadaan musqusha, waxayna ka qayb-geli karaan daryeelkooda nadaafadda. **(Fadlan ogow, xeerkan/siyaasadan ma khuseeyo carruurta qaba/leh Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah ee IEPs)**

Shilalka/qoyaanka (kaadida, saxarada) way dhici karaan wayna dhacayaan sidaas darteed waxaan kaa codsanaynaa inaad ugu soo dirto dhar beddel ah dugsiga ilmahaaga. Shilalka/qoyaanka (kaadida, saxarada), qeexitaan ahaan, waa shilal/qoyaan (kaadid, saxaro) aan caadi ahayn waxyna u dhacaan oo keliya si aan badnayn. Haddii shilalka/qoyaanka (kaadida, saxarada) ee musqulaha ay inta badan ka dhacaan dugsiga, shaqaalaha ECE waxay la tashan doonaan qoyska si ay u abuuraan qorshe gooni/qof-ahaaneed ah si wax looga qabto welwelka tababarka musqusha.

## DIIWAAN-GELINTA/QORISTA

***Fadlan ogow in habka diiwaan-gelinta/ meelaynta uu wax yar ka duwan yahay ardayda qabta/leh IEPs**

Ardayda ECE waa inay ahaadaan 4 jir 30-ka Sebteembar. Haddii ilmahaagu 5 jirsado 30-ka Sebteembar isaga/iyadu uma qalmi karaan fasalka (Pre-K) laakiin xaq bay u leeyihiin fasalka barbaarinta (Kindergarten-ka). * Fiiro gaar ah: Ardayda u qalma adeegyada Waxbarashada Gaarka ah waxay leeyihiin shuruudo da'doodu kala duwan tahay.

Diiwaan-gelinta onlaynka ah (OLR) waxa ay bilaabataa sanad walba bisha Febraayo balamahana waxay ka bilaabmaan bisha Abriil Diiwaan-gelinta Dhexe (Central Enrollment). Qaybta Waxbarashada Carruurnimada Hore waxay u hoggaansanaataa sanduuqa

lahaanshaha dawladda dhexe ee hab-raacyada mudnaanta diiwaan-gelinta fasalka (Pre-K) ee ardayda/qoysaska buuxiya mid ama in ka badan oo ka mid ah shuruudaha soo socda:

- Koriyaha (Aabe aan dhalin) Daryeela Dhalinta
- Qoysaska hela manfacyada SNAP (Kaarka cuntooyinka/food stamps)
- Qoysaska ku jira guri ku meel gaar ah (guri la'aan)
- Bartayaasha luuqadda Ingiriisiga

Tilmaamaha maalgelinta lahaanshaha dawladda dhexe waxaa kale oo ka mid ah diiwaan-gelinta mudnaanta leh ee ardayda la kulma labadan arrimood/qodob:

- Ardayda dhibka kala kulma/caqabad xagga qoraalka iyo akhriska (macluumaadka waxaa lagu soo aruuriyey sahan waalid oo khadka tooska /online-ka ah)
- Ardayda dhib/caqabad ku ah xagga hab-dhaqanka bulsho iyo mid shucuureed (macluumaadka waxaa lagu aruuriyey sahan waalid oo khadka tooska /online-ka ah)

Qoysaska aan buuxin shuruudahaas waxaa la gelin doonaa liiska sugitaanka oo haddii boos bannaan la heli karo, waxaa la ogeysiin doonaa waqti dambe.
Waalidka/wakiilka/masuulka sharciga ah ayaa dhamaystiri doona diwaan-galinta onlayn-ka ah oo waxay la kulmi doonaan Takhasusaha Diiwaan-galinta. Marka waraaqaha diiwaan-gelinta la soo gudbiyo oo ballanta la qabto, waalidka/wakiilka/mas'uulka ayaa geli doona Albaabka Xiriirka Waalidka oo ay dhammaystiri doonaan Codsiga Kahor fasalka (Pre-K). Waxay fursad u heli doonaan inay doortaan ilaa saddex dugsi si uu ilmahoodu fursad ugu helo inuu dhigto. Haddii wax deeq ah/ogolaansho la soo bandhigo, waalidka/wakiilka/masuulka waxay haystaan 48 saacadood inay ku ogolaadaan ama ku diidaan. Haddii waalidka/masuulka ilmaha uusan ka jawaabin soo jeedinta deeqda, si toos ah ayaa loo diidi doonaa.
FADLAN AKHRISO: Ardayda fasalka (Pre-K-da) ee ka diiwaan-gashan dugsiyada bakhtiyaa-nasiibka ee (Columbus Spanish Immersion, Columbus Africentric, Duxberry Park, Ecole Kenwood iyo Oakland Park) ee 2022-2023, waxay u baahan doonaan inay ka qayb-qaataan habka bakhtiyaa-nasiibka ee diiwaan-gelinta Xanaanada fasalka (Kindergarten-ka) ee 2023-2024. Ma jiro diiwaan-gelin mudnaan leh oo loogu talagalay fasalka Xanaanada (Kindergarten-ka).
Sababtoo ah baahida barnaamijka ECE waa mid aad u weyn, ardayda ku nool meel ka baxsan degmada Dugsiyada Magaalada Columbus looma tixgelin doono diiwaan-gelin.

Dukumiintiga/warqadaha baarista jirka iyo ilkaha ee xirfadlaha daryeelka caafimaadka 12-kii bilood ee u danbeyay oo ay la socoto waraaqaha kale ee diiwaan-gelinta waa in la dhammeeyaa ka hor inta aanu ilmuhu imaanin barnaamijka. Baaritaanadan waa in lagu soo cusboonaysiiyaa baaritaan cusub oona la soo diiwaan-geliyaa 12-kii biloodba mar.

## BEDELKA CINWAANKA

Dhaq-dhaqaaqa/guur-guurka ayaa qayb ka ah dugsiyadeena, qoysaskuna way guur-guuraan waqti ka waqti. Fadlan tag Albaabka Xiriirka Waalidka oo soo wareeji/soo rar macluumaadka loo baahan yahay. Fiidiyoow gaaban ayaa ku jira mareegta/websaydka degmada, ccsoh.us

diiwaan-gelinta hoosteeda (under enrollment) ayaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo soo wareejiyo/raro macluumaadka.

(Qoysaska waa in ay bixiyaan/ keenaan/gudbiyaan mid ka mid ah walxahan soo socda):

- Biilkii u dambeeyay ee tamarta (gaaska, korontada ama biyaha) oo ku qoran magaca waalidka/wakiilka/masuulka. (Biilka taleefoonka ama fiilada/cable-ka lama ogolaan karo).
- Heshiiska kirada ee hadda jira ee ku qoran magaca waalidka/wakiilka/masuulka. Magaca iyo lambarka taleefoonka mulkiilaha guriga waa in la bixiyaa/keenaa si loo xaqiijiyo heshiiska.
- Labadii jeegg shaqo ee ugu dambeeyay oo ay ku qoran yihiin magaca waalidka/wakiilka/masuulka iyo ciwaanka.
- Jeegagii mushaarka ugu dambeeyay, ee laga helay Waaxda Adeegyada Dadweynaha ama Bad-baadada/dammaanadda qaadka Bulshada (Social Security), ee loo soo diray waalidka.
- Qoraal ka soo baxay Waaxda Adeegga Aadanaha ama Bad-baadada/dammaanadda qaadka Bulshada (Social Security), oo ku qoran madaxa warqadda magaca hay'adda, taas oo tilmaamaysa ciwaanka waalidka ee uu u-adeegsado helitaanka jeegagga. Xitaa haddii waalidku jeegagga uu geeyey sanduuqa xafiiska boostada, shaqaalaha kiisku (caseworker) waxaa laga yaabaa inuu awoodo inuu bixiyo caddaynta ciwaanka waalidka, oo ku qoran madaxa xaashida wakaaladda.
- Qoraal ka soo baxay Xafiiska Shaqaalaha ee waalidku uu u-shaqeeyo, oo ku qoran madaxa warqadda, oo tilmaamaysa ciwaanka waalidku uu u-adeegsado ujeeddooyin shaqo iyo soo gudbinta foomamka Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS) W-2.
- Xog-waraysi Guriyeynta Ardayga (Student Housing Questionnaire) - ee qoysaska ku barakacay dhibaatada guriyeynta awgeed
- Caddaynta Xannaanada/Ilaalinta/Wakiilka (haddii aanu ahayn waalidka dhalay/ee la deggan) - Dukumiintiga wakiilka ka ah - Nuqul la Xaqiijiyay oo ah amarka garsooraha ama wareegto ama wax ka beddelka amarkaas oo qoondeynaya xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha waalidka iyo magacaabista waalidka la deggan iyo ilaaliyaha sharciga ah ee ilmaha (haddii ay khuseyso).

**Qoysaska la deggan qof kale ee MAAHA dhibaatada guriyeynta awgeed,** waa inay buuxiyaan foomka Xaqiijinta Degenaanshaha (Verification of Residency) oo ay qabsadaan ballanta beddelka ciwaanka iyaga oo wacaya 614-365-4011. Fadlan fariin ugu dhaaf qof ayaa kula soo hadli doona si uu ballan kuugu qabto. Waa inuu ballanta kaala soo qayb-galaa qofka aad la degan tahay. Waxay u baahan doonaan Teesaraha aqoonsigooda (ID) iyo nuqul ah biilkooda tamarta ee hadda ah (gaaska, biyaha ama korontada oo keliya) ama heshiis kiro/warqad magaciisa/magaceeda ku qoran oo loogu talagalay deganaanshahaas.

Beddelka cinwaanka sababta oo ah isbedel ku yimid haynta/ilaaliyaha (custody) waxay u baahan tahay diiwaan-gelin cusub oo onlayn-ka ah iyo ballan qoritaan.

Haddii qoyskaagu u guuro meel ka baxsan goobta dhigashada dugsiga uu ilmahaagu hadda ku jiro, fadlan la xiriir adeegaha bulshada (social worker) ee ECE si aad ugala hadasho furnaanshaha suurtogalka ah ee aagga cusub ee imaanshaha. *Qoritaanka dugsi cusub lama dammaanad qaadayo.* Carruurta leh IEPs, meelayn kale ayaa loo samayn doonaa oo ah dugsi u dhow ciwaanka cusub marka loo arko inay ku habboon tahay.

## XEERKA LEBISKA

Dugsiyada qaarkood waxay leeyihiin xeer lebbis u-gaar ah. Meesha ay arintu sidan tahay, waalidiintu waa inay u hoggaansamaan xeerarkaas haddii ay suurtogal tahay. Dugsiyadaas aan lahayn xeerka gaar ah, fadlan u labis ilmahaaga dhar caadi ah oo ku haboon ayna ku ciyaari karaan. Waxay kaga qayb-qaadan doonaan hawlo badan oo fir fircoon iyo kuwo "qallafsan ".

Ugu labis ilmahaaga si ku habboon xilliga iyo cimilada. Carruurtu maalin walba dibadda ayay u baxaan, haddii cimiladu ka sarreyso 20 darajo. Fadlan xasuusnow inaad usoo qaadato koofiyadaha iyo galoofyada iyo kabaha ku habboon carruurtaada.

Sababo bad-qabka awgeed ah, waxaanu ku waydiisanaynaa inaadan u ogolaanin ilmahaaga inuu xirto/xidho kabo ka furan faraha ama cirbaha/cidhbaha.

Iyada oo la raacayo xeerka lebiska Dugsiyada Magaalada Columbus, ardayda looma ogola inay xirtaan/xidhaan dhar garba qaawan ama dhexda ka qaawan, surwaalkana waa in dhexda laga xirtaa/xidhaa.

## DHAR DHEERAAD AH

Waa muhiim in ilmahaagu haysto dhar beddel ah oo lagu hayo dugsiga. Inta lagu jiro dugsiga, waxaa jiri kara shilal/qoyaanno (kaadi, saxaro) musqulaha ah, ciyaarta biyaha, rinjiyeynta, iyo hawlaha dibadda kuwaas oo keeni kara in dharka uu noqdo mid wasakh ama qoyan.
Fadlan soo dir surwaal, shaar/shaadh, labo sigisyo/sharabaado, iyo kastuumo/nigis maalinta koowaad ee dugsiga. Haddii dharka guriga loo soo diro, fadlan beddel maalinta xigta. Waxaa kale oo lagugula talinayaa inaad ku dhejiso dharka gudahiisa magaca ilmaha oo aad ku soo riddo dharkaaga bac uu ku qoran yahay magaca ilmahaaga.
Haddii ilmahaagu qabo/leeyahay IEP, oo aan weli loo tababarin musqusha, qorshee inaad u soo dirto xafaayado (diapers), ama qoyaan-dhowraha (pull-ups) iyo sidoo kale tir-tirayaal (wipes) lagu hayo dugsiga sanadka oo dhan. Dugsigu ma bixiyo xafaayado iyo tir-tirayaal. (Ardayda aan lahayn IEP waa iney ahaadaan kuwo si buuxda loogu soo tababaray musqusha/suuliga si ay u-dhigtaan dugsiga).

## SIYAASADDA NAFAQADA

Dugsigu wuxuu bixiyaa quraac, qado, iyo cunto fudud maalin kasta. Cuntooyinka maalinlaha ah waxaa ku jiri doona cuntooyin iyo cunto fudud oo buuxiya heerkii ama ka sarreeya Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA) ee ah Tilmaamaha Cuntada isu dheeli-tiran.
Waalidiinta waxaa laga codsanayaa inay hubiyaan liiska cuntada billaha ah ee guriga loogu soo diro ardayda oo laga heli karo websaydka CCS si ay cuntada u doorbitaan. Cuntada xuub-mur-muraysan ee (Hot dogs-ka ah) looguma adeego ardayda ECE sababta oo ah Akademiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta waxay ku sifeeyay sida wax lagu margado.

Xasaasiyadda/alerjga cuntada iyo codsiyada cuntada gaarka ah waxay u baahan yihiin qoraal dhakhtar kaas oo loo gudbin doono Cunto-yaqaanka Ka Diiwaan-gashan CCS si loo qiimeeyo loogana bixiyo jawaab ku salaysan sishakhsi ah.

<u>Caadooyinka Cunitaanka Caafimaadka leh</u>

- Waxbarashada nafaqaynta ku habboon da'da iyo kor uqaadista wax-qabadyada ayaa lagu dari doonaa waxbarashada fasalka.
- Cuntada iyo cabbitaannada looma adeegsan doono abaal-marin ama ciqaab wax-qabad tacliimeed ama dabeecadeed.

- Xubnaha shaqaaluhu waxay ku dhiirigelinayaan ardayda inay tijaabiyaan cuntooyinka cusub ama Cuntooyinka aanay jeclayn waligoodna laguma qasbi karo inay cunaan wax aanay jeclayn. Xubnaha shaqaaluhu waxay soo bandhigi doonaan cuntooyin cusub waxayna ku dhiirigelinayaan ardayda inay tijaabiyaan laakiin kama dhigi doonaan inay dhadhamiyaan ama cunaan cunto haddii aanay doonayn inay sidaas sameeyaan.
- Shaqaaluhu waxay xasuusin doonaan ardayda inay joojin karaan cunista marka ay dhergaan.
- Wakhti ku filan ayaa loo qoondayn doonaa marka ardaydu wax ka cunayaan dugsiga ama cunto fudud. Jadwalka maalinlaha ah wuxuu kor u qaadi doonaa nasasho iyo waqti ku filan oo cunto iyo cunto fudud ah.
- Carruurta waxaa looga baahan doonaa inay gacmaha dhaqdaan ka hor intaanay wax cunin.

Iyada oo qayb ka ah hindisaha caafimaadka iyo fayo-qabka ee Dugsiyada Magaalada Columbus, waxaanu siin doonaa tusaalayaal waalidiinta cunto caafimaad qabta si ay u siiyaan carruurta oo ah beddelka cuntada qoyska.

Cabitaannada Caafimaadka leh

Biyuhu waxay noqon doonaan cabitaanka kaliya ee la siiyo ardayda waqtiga ka baxsan quraacda iyo qadada la bixiyo si waafaqsan Barnaamijka Qadada Dugsiga ee Qaranka. Tan waxaa kale oo ka mid ah bixinta biyaha inta lagu jiro dabaaldegyada kale ee fasalka. Biyaha la cabbo waxay si xor ah u heli doonaan dhammaan ardayda maalinta oo dhan.

### XAFLADAHA FASALKA

Fasalada ECE waxay u hoggaansamaan siyaasadda dhismaha degmada ee ku saabsan dabaal-degyada fasalka. Abaalmarino aan cuntada ahayn ayaa loo door bidaa dabaal-degyada oo ay ku jiraan siin ah deeq ciyaarta fasalka, buug, ama shay yar sida meel-ku dhage (sticker) ama qalin-qori ee ilmo kasta. Haddi siyaasadda cunnada ay ilmahaaga u ogolaato cunnada ka baxsan dabbaal-degga, fadlan raac liiska cuntooyinka caafimaadka leh ee dugsigu bixiyo ama la xiriir/xidhiidh macallinka ilmahaaga si aad u hesho talo-bixinno, cuntadana waa inay ahaataa mid si ganacsi ahaan loo diyaariyey iyada oo xogta nafaqada iyo xasaasiyadda si cad loo sumadeeyey.

## QURAACDA

**Aad bay muhiim u tahay in ardaydu maalintaa ay ku bilaabaan quraac wanaagsan.** Dugsigu waxa uu leeyahay barnaamij quraac; si kastaba ha ahaatee, waalidiintu waa inay ilmahooda ku jiraan/haystaan barnaamijka, wakhtiga quraacda. Haddii ilmahaagu ka baaqdo wakhtiga quraacda, fadlan sii cuntada ka hor intaadan imaanin dugsiga. Wadashaqeyn-taadana aad baa loogu mahad-celinayaa.

### QIIMEYNTA CAAFIMAAD IYO ILKAHA

Waaxda Waxbarashada Ohio (ORC 3301-37-08) waxay uga baahan tahay ardaydu inay haystaan dukumiinti ku saabsan tallaallada loo baahan yahay iyo baaris/baadhis caafimaad 12-kii bilood gudahooda oo sheegaya in ardaygu ku sugan yahay xaalad ku habboon diiwaan-gelinta barnaamijka ka hor inta uusan bilaabin dugsiga. Ardaydu ma imaan karaan fasalka ilaa laga

buuxiyo shuruudahan. Dukumiintiga baarista waa in ay ku jiraan magaca ilmaha, taariikhda dhalashada, taariikhda baarista, taariikhdii hore ee caafimaadka, welwelka caafimaad ee hadda jira / ogaanshaha, natiijooyinka baarista, Diiwaanka tallaalka, saxiixa bixiyaha daryeelka caafimaadka, iyo xafiiska rasmiga ah/oo leh shaabadda/tiimbaraha rugta bukaan-socodka. Nuqul ka mid ah Diiwaanka Caafimaadka CCS ayaa loogu soo daray lifaaq ahaan buug-gacmeedkan laakiin dukumiinti kasta oo ka kooban macluumaadka loo baahan yahay ama daabacaad rasmi ah oo ka soo baxday baaritaanka xafiiska/ee rugta caafimaadka waa la ogolaan karaa. Haddii baaritaanka caafimaadku dhaco inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka, shaqaaluhu waxay xasuusin doonaan qoysaska taariikhda dhicitaanka, laakiin ugu dambeyntii waa mas'uuliyadda waalidka/mas'uulka inay xaqiijiyaan in baaritaannada caafimaadku ay yihiin kuwo cusub. **Ardayda waa laga saari doonaa inay joogaan/xaadiraan fasalka haddii cusboonaysiinta baaritaanka caafimaad ama tallaalada aan la helin wakhtiga ku habboon.** Dhammaan macluumaadka caafimaadka waa in la siiyaa macallinka fasalka ama ECE ama kalkaalisada dhismaha. Haddii ay dhibaato kaa haysato shuruudahan, fadlan kala xiriir/xidhiidh kalkaalisada ECE wixii gargaar/caawimaad ah ka wac **614-365-5822**. Baaritaannada ilkaha ee sannadlaha ah ayaa si adag loogula talinayaa dhammaan ardayda.
Haddii arday uu leeyahay xaalad joogto ah (sida neefta, xasaasiyadda/alerjiga cuntada, qalal/suuxdin, iwm.) ama baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah, fadlan la socodsii kalkaalisada ECE si daryeel ku habboon loo helo.

## Adeegyada Hubinta-Caafimaadka (Healthchek) ee Carruurta ka yar da'da 21

Hubinta-Caafimaadka hore (Healthchek) ee Ohio waa barnaamijka baarista iyo, ogaanshaha iyo daawaynta ee (EPSDT). Waa xirmo adeegg oo loogu talagalay dhallaanka, carruurta, iyo da'yarta waa-weyn ee da'doodu ka yar tahay 21 jir ee ka diiwaan-gashan Kaalmada Daawaynta Ohio (Ohio Medicaid).
Ujeedada Hubinta-Caafimaadka (Healthchek) waa in la ogaado oo la daweeyo dhibaatooyinka caafimaadka goor hore. Haddii dhibaato caafimaad oo suurtagal ah la helo, ogaanshaha iyo daawaynta dheeraadka ah waxaa daboolaya Kaalmada Daawaynta (Medicaid).

Hubinta-Caafimaadka (Healthchek) waxay dabooshaa toban baaritaan oo ah labada sano ee ugu horreeya nolosha iyo baaritaannada sannadlaha ah ee ka dambeeya waxayna bixisaa baaritaan jirka/jidhka oo dhammaystiran oo ay ku jiraan:

- taariikhda caafimaadka
- baaritaan buuxa oo dhar la'aan ah/qaawan (oo ay la socoto ogolaanshaha waalidka)
- Baaritaanka korriinka (si loo qiimeeyo haddii awoodaha jireed iyo maskaxeed ee ilmaha ay ku habboon yihiin da'da)
- baaritaanka aragga
- baaritaanka ilkaha
- qiimaynta maqalka
- Qiimaynta tallaalka (in la hubiyo inuu ilmuhu ku helo waqtiga loogu talagalay)
- baaritaanka sunta; iyo
- adeegyo kale ama baaritaanno/baadhitaanno haddii loo baahdo

Haddii carruurtaadu ka diiwaan-gashan yihiin Kaalmada Daawaynta Ohio (Ohio Medicaid), adeegyada Hubinta-Caafimaadka (Healthchek) waa u-diyaar iyaga. Haddii aad ka yar tahay da'da 21 jir oo aad sidoo kale ku qoran tahay, waxaad sidoo kale heli kartaa adeegyada Hubinta-Caafimaadka (Healthchek).

DAAWADA

Waxaan doorbideynaa in daawa kasta oo ilmahaagu qaadanayo lagu qaato guriga. Haddii loo baahdo, daawada waxaa lagu siin karaa ilmahaaga dugsiga ka dib marka la helo foomka oggolaanshaha daawada oo dhammaystiray oo uu saxiixay waalid/masuul iyo xirfadle daryeel caafimaad.  Shaqaalaha dugsiga looma ogola inay ogolaadaan wax daawooyin ah (daawooyin laguu qoray ama aan laguu soo qorin ee kuwa farmashiyaha laga iibsan karin) la'aanta foomkan oo dhamaystiran. Dhammaan dawooyinka waa in uu waalidka/masuulka ku soo dhiibaa weelka asalka ah oo uu ku dul qoran yahay weelka magaca ilmaha oo waa in lagu hayaa armaajo daawadeed qufulan/xiran. **Fadlan la socodsii macallinka ilmahaaga haddii dawooyinka looga baahan yahay dugsiga. Foomamka daawada waxaa laga heli karaa dugsiga, kalkaalisada dugsiga, ama mareegta/bogga/websaydka CCS.**

## XANUUNKA IYO CUDURKA LAKALA QAADO

Waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa isla markiiba lagu wargelin doonaa inay ilmahooda ka soo qaadaan dugsiga haddii uu isaga/iyadu xanuunsado/sato inta lagu jiro maalinta dugsiga. Xeerarka shatiga ODE ayaa dhigaya, ilmaha waa laga saarayaa dugsiga haddii isaga/iyada uu qabo/laga helo mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Shuban (wax ka badan hal saxaro oo jilicsan muddo afar iyo labaatan saacadood gudahood ah)
- Qufac daran
- Neefsasho adagg ama deg-degg ah
- Maqaar oo jaalle/huruud noqda ama indhaha
- Xinjirowga (Isha casaan-fudud/gaduud-fudud)
- Heerkulka oo noqda boqol darajo ee cabirka (Fahrenheit)
- Finanka aan la ogaan karin
- Kaadi aan caadi ahayn oo madow iyo/ama saxaro ah cawl ama cad
- Qoor/sur/luqun adag/tig-tigan
- Caddayn is-nanaamis/is-cun-cun, ama caabuqa uu keeno caya-yaanka ku dul nool noolaha kale
- Calaamad kasta ama astaan kasta oo ah cudur la kala qaado, oo uu ku jiro CAABUQA COVID-19-BAN

Fadlan la socodsii macallinka ilmahaaga wixii isbeddel ah ee kuyimaadda macluumaadka xiriirka/xidhiidhka deg-degga ah inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka oo dhan.

Haddii ilmahaagu uu leeyahay mid ka mid ah astaamaha horey loo soo sheegay waa inaad isaga/iyada ku haysaa guriga ilaa inta uu ka helayo caafimaad ah inuu ku soo laabto dugsiga. Ilmahaagu waa inuu guriga joogo 24 saacadood ka dib marka uu shubanku, mataggu, ama qandhadu ka dhammaado (iyada oo aan la siinin dawooyinka qandho-jabiska ah).

Haddii ilmahaagu qabo finan aan la aqoonsan, isaga / iyada waa in uu nadiifiyaa bixiyaha daryeelka caafimaadka ama uu joogo guriga ilaa finanku ka baxayaan/dhammaadaan.

Macluumaad dheeraad ah oo caafimaad iyo foomamka ayaa laga heli karaa mareegta/websaydka CCS ee hoos timaada Adeegyada Caafimaadka, Qoyska, iyo Adeegyada Bulshada.

## BAARITAANKA CAAFIMAADKA

Waaxda Waxbarashada Ohio waxay u baahan tahay in baarista/baadhista caafimaad ay dhamaystirto kalkaalisada diiwaan-gashan sanad walba inta ilmahaagu ku jiro barnaamijkeena. Baaritaankan waxaa ku jira dhererka, miisaanka, tusmada cufka jirka, aragga, maqalka, iyo hubinta ilkaha waxaana lagu dhameyn doonaa dugsiga natiijadana waxaa loo soo diri doonaa waalidka/mas'uuliyiinta. Tani ma buuxinayso shuruudaha baaritaanka caafimaadka ee xirfadlaha daryeelka caafimaadka.

## SAWIRRADA

Inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka macallimiin badan ayaa sawiro ama muuqaalo ka qaada fasallo ama mashruucyo kala duwan oo dugsi. Sawirrada ayaa laga yaabaa in xitaa loo qaado si loogu horumariyo qalabka tababarka xirfadeed. Foomka fasaxa-siideynya (release form) "Ogolaanshaha Sawirka" ayaa lagu siin doonaa inta lagu jiro diiwaan-gelinta dugsiga.

## KA QAYB-GALKA IYO DAAHITAANKA

Aad bay muhiim u tahay in ilmahaagu dugsiga ku tago/xaadiro wakhtii loogu talagay maalin kasta. Marka ardaygaagu ka maqnaado tiro badan oo dugsiga ah, xataa haddii maqnaanshaha cudur daar laga bixiyo, ilmuhu wuxuu lumiyaa wakhtiga waxbarashada ee muhiimka ah iyo fursadaha waxbarasho. Maqnaanshaha 1 ama 2 maalmood, labadii toddobaadba mar, waxay noqon kartaa:

- Mid adkaysa horumarinta xirfadaha akhris-qoraalka-qorista hore.
- Mid ka sii adkaysa inaad u diyaargarowdo xanaanada (kindergarten-ka) iyo wixii ka dambeeya.
- Mid Sameysa qaab imaansho liidata oo ay adagtahay in la gudbo/lajebiyo.

Sharciga cusub ee gobolka ayaa qeexaya maqnaanshaha xad dhaafka ah iyo goysmada:

**Maqnaanshaha xad dhaafka ah (Excessive absence)**: ardaygu waxa uu seegayaa 38 saacadood ama ka badan oo dugsi ah hal bil gudaheed, ama 65 saacadood ama ka badan hal sannad dugsiyeedka, cudurdaar sharci ah ama sharci la'aanna.

**Gooysmada (Truancy)**: ardaygu wuxuu ka maqan yahay dugsiga cudur daar la'aan 30 saacadood ama ka badan oo xiriira/xidhiidha, 42 saacadood ama ka badan bishii, ama 72 ama ka badan oo saacadood sannad-dugsiyeedka.

Haddii ardaygu maqnaado 30 saacadood ama in ka badan oo xiriir/xidhiidh ah (4.5 maalmood) ama 42 saacadood ama ka badan hal bil gudaheed (6.5 maalmood), warqad ayaa loo diri doonaa qoyska. Haddi imaanshahu/xaadirkaagu aanu soo roonaanin/soo wanaag-sanaanin, waxaa laga yaabaa in kulan balan ah lagaala soo yeesho Adeegaha Bulshada (Social Worker) ee ECE si loo horumariyo qorshaha guusha.

Haddii ardaygu uu maqnaado 10 maalmood oo xiriir/xidhiidh ah (65 saacadood), warqad ayaa loo diri doonaa qoyska, ardayguna waa laga saarayaa maalinta 15-aad ee uu dugsiga ka maqan yahay.

## OGGOLAANSHAHA SOO QAADISTA ILMAHA

Waalid kastaa waa inuu buuxiyaa foomka oggolaanshaha oo tilmaamaya qofka loo oggol yahay inuu ilmahaaga ka soo qaado dugsiga. Haddii qofka loo oggolaaday inuu ilmaha soo qaado, uu

yahay qof aan ahayn waalidka iyo qof ayna garanaynin shaqaalaha ECE, **aqoonsi sax ah (ID)** ayaa laga codsan doonaa marka ugu horeysa ee la qaadayo. **<u>Waalidiintu waa inay la xiriiraan macallinka ECE marka uu jiro isbedel ku yimaada qofka loo ogolaaday inuu qaado ilmahaaga.</u>**

## LAMBARKA DEG-DEGGA AH

Waalidiinta/mas'uuliyiinta waa inay haystaan 3 lambar oo taleefoonka deg-degg ah si ay u wacaan oo ay u diyaariyaan/u-habeeyaan ardayga in la soo qaado haddii ay dhacdo daahitaan ama xaalado kale oo deg-degg ah. Lambaradani waa inay ku jiraan kaarka deg-degga ah ee la bixiyey wakhtiga diiwaan-gelinta ama jihaynta/hanuunin (orientation-ka). Waalidku <u>waa in uu</u> ogeysiiyaa dugsiga marka lambarka deg-degga ahi isbeddelo, dugsiguna **waa in uu haystaa lambar shaqeeya xaaladaha deg-degga ah si uu ula xiriiro mar kasta.**

## BADBAADADA ILMAHA, IYO ILAALINTA SHARCIGA

Bixinta waxbarasho wanaagsan ee carruurta iyo ilaalinta nab-doonaantooda/ammaankooda waa yoolalka muhiimka ah ee Dugsiyada Magaalada Columbus. Waxaan sameyn doonaa wax walba oo aan awoodno si aan u gaarno yoolalkan. Fadlan sidoo kale maskaxda ku hay in sharci ahaan ay waajib nagu tahay inaan soo sheegno tuhun kasta oo ah dayacnaan iyo/ama xad-gudub ah.

Waaxda Waxbarashada Ohio (ODE) ayaa shati siisay dhammaan fasallada Carruurnimada Hore ee Dugsiyada Magaalada Columbus.  Booqashada kormeerka sannadlaha ah ayaa la qabtaa sannad kasta si loo hubiyo in dhammaan goobuhu ay u hoggaansamaan Shuruucda Shatiga/Ruqsadda Dugsiga Ka Hor (Preschool) ee ODE. Warbixinnada u hoggaansanaanta wixii (cabasho ah) ayaa lagu dhejiyaa/fidiyay fasal kasta. Waalidiintu waxay heli karaan nuqulka warbixinta u hoggaansanaanta fasalka markay ay la xiriiraan macallinka ECE. Si loo xareeyo cabasho ku saabsan ku xad-gudubka Shuruucda Shatiga Dugsiga ka hor (Preschoo), waalidiintu waxay kala xiriiri karaan Xafiiska Waxbarashada Carruurnimada Hore 614-466-0224 ama Dhexdhexaadiyaha Waaxda ee (Ombudsman) ee 614-466-4839.

## XEERARKA ANSHAXA/AADAABTA CARUURNIMADA HORE

Dugsiyada Magaalada Columbus 'Barnaamijka Xannaanada ka hor ee (Pre-Kindergarten Program) waxay adeegsadaan hab togan/wacan, oo horumarsan ee ah xagga anshaxa fasalka. Macallinka dugsiga barbaarintu wuxuu bilaabaa habka-asluubta togan/wacan maalinta ugu horreysa ee dugsiga isaga oo sameynaya waxyaabaha soo socda:

Hawl-gelinta carruurta marka la samaynayo xeerarkan fudud:

- Inagu waynu ixtiraamnaa nafteena iyo midba midka kale.
- Waxaan adeegsanaa codadkeena oo hooseeya inta aan joogno dhismaha gudihiisa.
- Waxaan nadiifinaa booskeena markaan dhameyno shaqadeena iyo ciyaarteena.
- Waan dhegaysanaynaa marka ay kuwa kale hadlayaan.

Habaynta fasalka si loo gaaro yoolka maamul wanaaga fasalka.

Qorshaynta hawlaha ku habboon oo leh dheellitir firfircoon iyo dhaq-dhaqaaqyo deggan inta lagu jiro maalinta.

U muujinta welwel, daryeel iyo xaqsoor ilmo walba.

Si joogta ah u dhaqan geliya xeerarka iyo waxa laga filayo.

Anshaxa barbaarinta fasalka ee (preschool-ka) waxaa loo arkaa inuu hagayo hab-dhaqanka carruurta. Hadafka ugu dambeeya ee edbinta waa in laga caawiyo carruurta inay xakameeyaan hab-dhaqankooda /dabeecadooda.

Hagid iyo farsamooyin maamul oo wax dhisa, korriin ahaan ku habboon ilmaha ayaa la adeegsadaa mar kasta.

Tallaabooyinka waxaa ka mid ah, balse kuma koobna kuwa soo socda: wakhti go'an, dib u hagid, la hadalka ilmaha iyo waalidka, kor u-qaadidda hab-dhaqanka haboon iyo samaynta xeerarkan fudud ee fasalka dugsiga barbaarinta (preschool).

Inta yar oo carruur ah ayaa laga yaabaa inay carqaladeeyaan ama aan awoodin karin inay la qabsadaan hawl-maalmeedka caadiga ah, shaqaalaha dugsiga ee barbaarinta (preschool) ayaa u-samayn doona qorshe hawleed waalidka (iinta) si ay u caawiyaan ilmaha.

**Aadaabta//anshaxa/akhlaaqda wanaagsan/ togan, oo leh horumarka waxay ku salaysan tahay tilmaamaha/xeerarka soo socda:**

- Xushmad/Ixtiraam loo hayo ilmo kasta qof ahaan.
- U heellanaanta daryeelka iyo fayo-qabka ilmo kasta.
- Ka fogaanshaha naxariis darrada, qallafsan, ciqaab jireed ama mid aan caadi ahayn.
- Ka fogaanshaha xakamaynta jireed, af-xumada, hanjabaadaha, hadalada cayda ah iyo/ama aflagaadada.
- U hoggaansanaanta meelaha iyo waqtiyada kala-tagga habboon ee ku salaysan da'da iyo awoodda korriinka ilmaha.
- Ka dheeraanta nooc kasta oo ka mid ah xadgudubka iyo dayaca ilmaha.

## HEERARKA IYO XEELADAHA FARAGELINTA DABEECADDA/HAB-DHAQANKA

Dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay wax bartaan, mana jiro arday xaq u leh inuu carqaladeeyo hawlaha waxbarasho ee dadka kale. Bad-qabka iyo nabad-galyada ilmahaaga ayaa ah mudnaanteena ugu sarreysa waxaana naga go'an inaan bixino deegaan waxbarasho oo bad-qab leh. Ka waalid ahaan Dugsiyada Magaalada Columbus, ESSA ee (Sharciga Guuleysiga Arday Kasta) ayaa sheegaya inaad xaq u leedahay: inaad galaangal/galitaan u yeelato heerarka waxqabadka qof-ahaaneed ee ilmahooda ee qiimaynta gobolka oo dhan, oo aad ogaato haddii dugsiga ilmahoodu uu horumar ku samaynayo si waafaqsan kaarka warbixinta gobolka

Hagaha Guusha Ardayga waxa uu bixiyaa qeexitaanno ku saabsan xad-gudubyada dabeecadda/dhaqanka oo qeexaya liiska cawaaqibka ka dhalan kara dabeecad-xumada/dhaqan-xumada awgeed. Anshax-xumada waxaa lagu qeexaa sida ay u kala horreeyaan ee ah sida:

| | |
|---|---|
| **Heerka I-aad** | Dembiyada yar-yar |
| **Heerka II-aad** | Soo noq-noqoshada Dembiyada Heerka I-aad ama dhaqan xumo daran |
| **Heerka III-aad** | Heerka I-aad ama Heerka II-aad ee dembiyada Soo noq-noqday, ee sharci-darrada ah iyo/ama anshax-xumada daran, ama dembiga nolosha ama caafimaadka halis gelinaya |

Shaqaalaha Dugsiyada Magaalada Columbus waxay siiyaan heerarka sixitaanka ee xeeladaha wax ka qabadka iyo edbinta ardayda ku guul dareysata inay ka soo baxaan wax-yaabaha filashooyinka hab-dhaqanka ah. Ciqaabta jireed nooc kasta ha ahaatee lama ogola.

Xulashooyin badan oo lagu saxayo dabeecadda/hab-dhaqanka ardayga ayaa laka dooran karaa iyada oo ku xiran baahida ardayga, oo ay ku jiraan da'da iyo heerka fasalka ardayga, taariikhda ardayga ee dabeecad-xumada, iyo dembiga gaarka ah iyo halistiisa. Shaqaalaha dugsigu waxay adeegsadaan xeeladaha wax-ka-qabashada hoos lagu qeexay/sharraxay si ay u caawiyaan kor-u-qaadista dabeecadaha/hab-dhaqanka la rabo.

### Xeeladaha Faragelinta ee CCS

**Xiriirka/Shirka Waalidka**– Ogeysiinta iyo la kulanka waalidka ee ku saabsan anshaxa ardayga ee ah dhammaan falalka anshaxa/edbinta.

**Xeeladaha Hab-dhaqanka ee Ku Salaysan Dugsiga** – Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- Abuuritaan heshiis hab-dhaqan oo lala samaynayo ardayga
- Bar/Baro xeeladaha maaraynta carada/xanaaqa
- Waayidda/luminta mudnaanta/dhorsanaanta dugsiga
- Dib-u-barista rajada/filashada hab-dhaqameedka
- U gudbinta la taliyaha dugsiga ama adeegaha bulshada dugsiga
- U-gudbinta Kooxda Caawinta Dhex-galka/Faragelinta ama bilaw Nidaamyada Kala duwan ee HeerkaTaageerada ee (MTS.S.)

# ADEEGYADA WAXBARASHADA GAAR AH

Barnaamijka Waxbarashada Carruurnimada Hore wuxuu bixiyaa/siiyaa adeegyo badan oo loogu talagalay carruurta baahiyaha gaarka ah qaba, iyo qoysaskooda. Sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan adeegyadan waxaa laga heli karaa buug-yaraha "FIKRADAHAN Iyada ah" ("IDEA Whose This") taas oo la siiyo waalidiinta inta lagu jiro habka/nidaamka gudbinta, qiimaynta, iyo meelaynta. Faah-faahin kooban oo ku saabsan adeegyadan ayaa lagu bixiyaa/laga helaa xagga hoose.

## Qiimaynta:

Carruurta loo diro/loo dudbiyo adeegyada baahiyaha gaarka ah waxaa laga yaabaa inay helaan qiimayn dhinacyo badan leh oo wax kharash ah aanu kaga bixin qoyska. Qiimaynadan waxaa ku jiri kara qiimaynta adeegayaasha bulshada (social workers) dugsiga, macallimiinta, kalkaalisooyinka dugsiga, cilmu-nafsiga dugsiga, daaweeyayaasha hadalka iyo luuqadda, daaweeyayaasha xirfadda, iyo/ama daaweeyayaasha jirka/jidhka. Qiimayntu waxay ka kooban tahay waraysiyo, indho-indhayn, qiimayn heer sare ah, iyo qiimayno tixraac shuruuc leh. Marka qiimayntu dhammaato, waalidiinta waxaa lagu martiqaadayaa inay la kulmaan kooxda qiimaynta si loo go'aamiyo u-qalmitaanka ilmaha ee adeegyada waxbarashada gaarka ah.

## Barnaamijka Waxbarashada Gaarka/Gooni-Goonida ah (IEP):

Haddii ilmaha la go'aamiyo inuu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka/gooni-goonida ah sida ay qabaan Xeerarka Ohio ee Waxbarashada Carruurta Dugsiga ka hor (Preschool ) ee Naafada ah, waalidka waxaa lagu martiqaadi doonaa inay ka soo qayb-galaan shir lagu qorayo Barnaamijka Waxbarashada Gaarka/Gooni-goonida ah ee (IEP). Barnaamijkan waa in ay si wadajir ah u horumariyaan waalidiinta, macallinka, iyo shaqaalaha adeegga ee la xiriira/xidhiidha IEP-ga waxaana ku jiri doona yoolalka iyo ujeedooyinka wax looga qabanayo ilmaha inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka waana in laga diiwaan-geliyaan goobta sida ugu fiican ee looga bixin karo adeegyadaas.  IEP-da waa in la qoraa ka hor inta aan adeeg bixinta la bilaabin, waana in dib loo eego ugu yaraan afar jeer sannad-dugsiyeedka, waana in dib loo eego ugu yaraan hal mar sannadkiiba. Waalidiintu waxay codsan karaan dib u eegis IEP-da wakhti kasta.

## Adeegyada La Xiriira:

Qiimaynta ka dib, kooxda IEP waxaa kale oo laga yaabaa inay go'aamiyaan in ilmuhu u qalmo adeegyada la xiriira/la xidhiidha. Adeegyadan waxaa ku jiri kara daawaynta xirfadeed (occupational therapy), daaweynta jireed (physical therapy), daaweynta hadalka iyo luuqadda (speech and language therapy), adeegyada cilmi-nafsiga ee dugsiga, adeegyada kalkaalisada dugsiga, hanuuninta/hagidda iyo kartida dhaq-dhaqaaqa, iyo/ama gaadiidka. Tirada/cadadka adeeg kasta waa in laga diiwaan-geliyaa IEP-da. Adeegyadan waxaa dib loo eegi doonaa mar kasta oo IEP-da dib loo eegayo.

### BAYAANKA DIB U QIIMEYNTA EE BARNAAMIJYADA DA'DA-DUGSIGA

*(LOOGU TALA GALAY ARDAYDA QABTA IEPS-dA)*

Waxaa lagugu soo wargelin doonaa marka uu ilmahaagu diyaar u yahay barnaamijka da'da dugsiga. Habkan dib-u-qiimaynta waxaa guud ahaan loo tixraacaa sida kala-guurka. Waa lagula soo xiriiri doonaa waxaana loo baahan doonaa ogolaanshahaaga si loo dhamaystiro nidaamka. Haddii ilmahaagu hadda ku jiro dugsiga magaalada Columbus, qiimayntu waxay ka dhici doontaa dugsigaas.

Kooxda dib-u-qiimaynta waxaa ku jiri kara waalidiinta, Isuduwaha Waxbarashada Gaarka ah, Cilmi-nafsiga Dugsiga, Macallinka Dugsiga baahiyaha gaarka ah ka hor ee (Preschool), Macallinka Waxbarashada Guud, Daaweeyaha Xirfadeed, Daaweeyaha Jirka, iyo Khabiirka Hadalka iyo Luuqadda. Kooxdu waxay samayn doontaa baaritaano isdaba joog/taxane ah iyo indho-indhayn si loo go'aamiyo baahiyaha ilmahaaga ee sannad-dugsiyeedka soo socda. Natiijooyinka qiimaynadan ayaa go'aamin doona haddii uu ilmahaagu u qalmi doono adeegyada waxbarashada gaarka ah ee hoos yimaada hab-raacyada da'da dugsiga. Marka la go'aamiyo u-qalmitaanka, xulashada meelaynta ayaa lagaala hadli doonaa.

Ku meelaynta ilmahaaga ee fasalka Waxbarashada Carruurnimada Hore si toos ah uma dammaanad qaadayso oggolaanshaha ilmahaaga ee dhismahaas adeegyada da'da dugsiga. Haddii aad xiisaynayso dugsi aan ahayn dugsigaaga xaafadda guriga ee xanaanada (kindergarten-ka), kabina waxaad u baahan tahay inaad buuxiso bakhtiyaa-nasiibka dugsiga/foomka xulashada/doorashada dugsiga.

## GAADIIDKA

*(LOOGU TALA GALAY ARDAYDA QABTA IEPs-dA*)

Carruurta da'yarta ah ee qaba IEP ayaa laga soo qaadaa guriga oo la geeyaa dugsiga iyo guriga oo mar kale la keenayo. Degmadu loogama baahna inay ka soo qaado guriga lagu hayo ilmaha ama meelo kale oo ka duwan. Haddii aad ku nooshahay meel ay ku adag tahay inuu baska dugsigu soo galo oo uu ka soo jiireyn karo, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ilmahaaga u kaxayso geeska/koona kuugu dhow.

Qof qaan-gaara ayaa laga filayaa inuu la joogo ilmaha ilaa basku ka yimaado oo uu ka caawiyo sidii ilmahaaga baska loo saari/u-raaci lahaa. Qof qaan-gaara ayaa sidoo kale laga filayaa inuu baska la kulmo/ku sugo boosteejada baska dhammaadka maalinta dugsiga ee ilmahaaga. Haddii uusan jirin Qof qaan-gaara oo la kulma ilmahaaga safarka ku laabashada guriga, isaga/iyada waxaa loo gayn/qaadi doonaa Hay'adda Adeegyada Carruurta ee Degmada Franklin oo ku taal 535 E. Mound St. Columbus, taleefoonkuna waa 614-229-7000.

Haddii ilmahaaga la siiyo suunka lagula xiro kursiga buska, kaas oo u adeega sida suunka baska, waxaa laga rabaa inuu ilmahaagu xirto/xidho marka uu isaga/iyada baska fuulo/fuusho si uu dugsiga u aado iyo waliba marka ilmahaagu ku soo noqonayo guriga. Jinyeeru (zipper) waa inuu garaa dhabarka. Haddii ilmahaagu adeegsan doono kursiga fadhiga ilmaha (car seat), suunku (harness-ku) wuxuu sii saarnaan doonaa baska.

Waalidiinta waxaa laga filayaa inay soo wacaan xafiiska gaadiidka iyo dugsiga marka ilmuhu maqnaan doono. Lambarka gaadiidku waa 614-365-5074. Diyaarinta/Qabanqaabada hore ee gaadiidka iyo isbeddelada waxaa laga sameeyaa xafiiska Xannaanada (Preschool) ee Baahiyaha Gaarka ah. Su'aalaha ku saabsan diyaarintaan/qabanqaabadaan waxaa lagu sameyn karaa adiga oo wacaya 614-365-5205.

Sidoo kale, haddii aad qorsheyneyso inaad soo qaadato ilmahaaga, fadlan wac dugsiga oo u sheeg macallinka. Haddi aanad dugsiga joogin marka uu basku baxayaan, ilmahaaga waxaa la soo saarayaa baska guriga. Ma jirto wax xanaano/hayn caruur ah oo laga bixiyo ka hor/ka dib dugsiga.

### BARNAAMIJKA KU WAJAHAN HAGIDDA/TUSMADA WAALIDKA *(LOOGU TALA GALAY ARDAYDA QABTA IEPS-dA)*

Qoysaska loo soo gudbiyo adeegyada baahiyaha gaarka ah, barnaamijka ECE wuxuu leeyahay in shaqaalaha waalidiinta ah ee leh carruurta qaba baahiyaha gaarka ah inay uga jawaabaan su'aalaha Haddii aad jeclaan lahayd inaad la hadasho lataliyaha waalidka ah waxaa lagala xiriiri karaa 614-365-5211.

### KA QAYB-QAADASHADA QOYSKA & BAH-WADAAGTA/DENEEYAASHA

Waalidiinta iyo xubnaha qoysku waa qayb muhiim ah oo ka mid ah Waayo-aragnimada Waxbarashada Carruurnimada Hore waxayna ku lug leeyihiin dhammaan dhinacyada barnaamijkeena. Maadaama uu yahay macallinka koowaad ee ilmaha, waalidiinta waxaa loo arkaa inay yihiin bah-wadaagta habka waxbarashada. Barnaamijka Waxbarashada Carruurnimada Hore wuxuu qoysaska siinayaa dhowr laka xulasho/ikhtiyaar oo ay ku haw-lan yihiin waxbarashada ilmahooda:

- Baro macallinka ilmahaaga oo go'aami habka ugu wanaagsan ee aad ula xiriiri karto isaga/iyada (taleefoon, iimayl, qoraal, qoraalo maalinle ah oo ku jira boorsada buugta, iwm.). La wadaag rabitaanadaada aad u leedahay ilmahaaga.
- Noqo waalid xog ogaal ah adiga oo eegaya/hubinaya boorsada ilmahaaga maalin kasta si aad u ogaato waxa ilmahaagu hadda ka baranayo dugsiga. Weydii su'aalo markaad dareento inaad u baahan tahay inaad wax badan ka ogaato mawduuca.
- Iskaa hawl uga qabo fasalka.
- Ka qayb-gal oo ka caawi qorshaynta dhacdooyinka habeenka qoyska iyo Guriga Furan (Open House) oo ah fursad barasho macallinka, dular guud dugsiga iyo manhajka sanadka.
- Ka qayb-gal oo ka caawi qorshaynta safarrada dugsiga ka baxsan (field trips).
- Ka qayb-qaado shirarka waalidka/macallimiinta iyo aqoon-is-weydaarsiyada.
- Iskaa hawl uga qabo oo noqo hooyada/aabaha qolka.
- Ka qayb-qaado fursadaha la-talinta/hagida/tusmada ee qoys-qoys.
- Ka caawi qorista warsidaha qoyska.
- Qorshayso maalin shaqo oo fasalka la wadaag kartidaada.

Qoysasku waxay ku caawin karaan carruurtooda guriga iyaga oo isku dayaya talooyinka iyo fikradaha soo socda:

- Ka caawi ilmahaaga inuu bilaabo maalin kasta isaga oo diyaar u ah inuu wax barto adiga oo hubinaya inuu isagu/ iyadu heleen hurdo fiican, cuneen quraac caafimaad leh oo ay ku aadaan dugsiga waqtigii loogu talagalay.
- Maalin kasta wax u akhri ilmahaaga oo noqo tusaalaha wax akhrinta ilmahaaga.

- Waqti sii maalin kasta aad ku waydiiso su'aalo-furan oo leh dhammaad, dhagayso oo kala sheekayso waxa ilmahaagu ka bartay dugsiga.
- Ilmahaaga u saxiix kaarka maktabadda (library card) oo badi booqashada maktabadda.
- Uhel/sii meel degan oo gaar ah adiga iyo ilmahaaga markaad wax-wada akhrisanaysaan ama samaynaysaan wax-qabadyo waxbarasho.
- Abuur waqtiyo waxbarasho. Dhacdooyinka maalinlaha ahi waxay noqon karaan fursad wax lagu barto. Tusaale ahaan: diyaarin/qorshayn jadwal waxay bari kartaa xirfadaha xisaabta iyo raacitaanka tilmaamaha, inta lagu jiro socdaalka wax iibsiga ka hadal midabada, qaababka, xarfaha, tirada iyo erayada aad aragto.
- Uruurinta agabka kor loogu qaadayo waxbarashada guriga: buugaagta, sabuuradda/looxa ciyaaraha, xujooyinka (puzzles) iyo agab-yada farshaxanka. Haw-lahaasi waxay dhiirigelin karaan horumarinta xirfadaha fikirka muhiimka ah.
- Maalin kasta weydii ilmahaaga inuu ku baro/kuu sheego waxa ay dugsiga ka soo barteen.
- Sii wad inaad kala xiriirto muhiimada dugsiga adiga oo diyaarinaya rajooyinka ku habboon guusha ilmahaaga.

# FOOMKA HESHIISKA QOYSKA WAXBARASHADA CARUURNIMADA HORE

Waxaan dib u eegay nuqul/koobi ka mid ah Buug-gacmeedka Qoyska ee Waxbarashada Carruurnimada Hore ee Dugsiyada Magaalada Columbus kaas oo ka kooban macluumaadka barnaamijka Baarista-caafimaad (Healthchek).

_____________________________________________________________________________

Saxiixa Waalidka/Masuulk                                        Taariikhda

Waxaan fahansanahay in haddii ilmahayga lagu meeleeyo fasalka Waxbarashada Carruurnimada Hore, wakiil ka socda Waaxda Waxbarashada Ohio ayaa booqan doona fasalka sannad kasta si loo hubiyo u hoggaansanaanta Shuruucda Shatiga Dugsiga Ka Hor (Preschool) ee Ohio. Waxaan heli karaa nuqul ka mid ah warbixinta u hoggaansanaanta aniga oo la xiriiraya macallinka ilmahayga. Si aan u xareeyo cabasho ku saabsan ku xad-gudubka Shuruucda Shatiga Dugsiga ka hor (Preschool), waxaa laga yaabaa in aan kala xiriiro/xidhiidho Xafiiska Waxbarashada Carruurnimada Hore 614-466-0224 ama Waaxda Dhex-dhexaadiyaha (Ombudsman) ee 614-466-4839.

_____________________________________________________________________________

Saxiixa Waalidka/Masuulk                                        Taariikhda

Waxaan dib u eegay nuqul ka mid ah Hagaha Dugsiyada Magaalada Columbus ee Guusha Ardayga kaas oo ka kooban siyaasadda Anshaxa Waxbarashada Carruurnimada Hore. Waxaan saxiixay qoraalka Oggolaanshaha Siideynta Macluumaadka ee ku yaal gadaasha dukumiintigan kaas oo qeexaya sida degmadu u adeegsan karto ama aanay u adeegsan karin sawirrada, maqalka, muuqaalka ama danabaysan/elektarooniga ah ee ilmahayga.

_____________________________________________________________________________

Saxiixa Waalidka/Masuulk                                        Taariikhda

Waxaan fahansanahay in tan iyo markii ilmahayga lagu meeleeyay fasalka Waxbarashada Carruurnimada Hore, waxaan haystaa ikhtiyaarka ah in lagu daro liistada waalidka/ilmaha fasalka kaas oo ay ku jiraan magaca ilmahayga iyo taariikhda dhalashada, magacayga iyo macluumaadka xiriirka/xidhiidhka. Macluumaadkan waxaa lala wadaagi karaa waalidiinta kale ee caruurtooda fasalka dhigato.

________Waxaan bixiyay ogolaanshaha macluumaadka kor ku xusan in lagu daro liistada fasalka.

________MA BIXIN ogolaanshaha macluumaadka kor ku xusan in lagu daro liistada.

_____________________________________________________________________________

Saxiixa Waalidka/Masuulk                                        Taariikhda

Waxaan xiiseynayaa inaan wakiil u noqdo Kooxda Waalidka Waxbarashada Carruurnimada Hore.
_______ HAA    _______ MAYA

Qaybta Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada Taageerada
Ardayga ee Waaxda Waxbarashada Carruurnimada Hore

# Siyaasadda ka qayb-galka

Aad bay muhiim ugu tahay ilmahaagu inuu dugsiga tago maalin kasta. Marka ardaygaagu uu ka maqnaado muddo badan oo dugsiga ah, xitaa haddii maqnaanshaha cudur daar laga bixiyo, ilmuhu waxa uu lumiyaa wakhtiga waxbarashada muhiimka ah iyo fursadaha waxbarasho. Haddii ardaygu ka maqnaado 30 saacadood ama ka badan oo xiriir/xidhiidh ah oo cudurdaar la'aan ah oo dugsiga ah, ama 42 saacadood ama ka badan oo cudurdaar la'aan ah hal bil gudaheed ardaydu waxaa laga yaabaa in laga saaro Barnaamijka Waxbarashada Carruurnimada Hore. Haddii ardaygu maqnaado toban maalmood oo xiriir/xidhiidh ah (65 saacadood), warqad ayaa loo diri doonaa qoyska, ardaygana waxaa laga saarayaa maalinta 15-aad ee ka maqanshaha dugsiga.

Haddii ardaygaagu maqnaan doono ama soo daahi doono, waa masuuliyadaada inaad ogaysiiso dugsiga haddii ay dhacdo maqnaanshaha, soo gudbi qoraal si maqnaanshaha cudur daar looga dhigo/bixiyo.

Maqnaanshaha waxaa looga cudur-daaran/mar-mar-siyoon karaa sababaha soo socda awgood:

- Jirrada qof-ahaaneed (waxaa laga yaabaa inay kaga cudur-daartaan waalidka/masuulka sharciga ah wicida taleefoon, cudur-daar qoraal ah ama warqad dhakhtar)
- Jirro ama dhimasho ka jirta qoyska oo dhow (oo leh warqadda waalidka/dhakhtarka oo la soo gudbiyay)
- Ballamaha caafimaadka ama ilkaha, waxaa laga yaabaa inay u baahdaan xaqiijin qoraal ah oo ballan ah
- Fasax ciid-diimeed

Waan akhriyay oo waan fahmay waxa kor ku xusan.

__________________________________________ ______________

Saxiixa Taariikhda